

**<<INSERT SCHOOL LOGO / INFORMATION HERE – GRADE 7 AND UP – WEB  
BASED SURVEY>>**

**<<DATE>>**

Waalidka Qaaliga ah:

Simistarka **deyrta**, ardayda fasalka **<<INSERT GRADES>>** ee dugsigayagu waxa ay ka qayb qaadanayaan baaritaan **qarsoon oo bogga internetka lagu sameynayo**. Baaritaanka qarsooni waa marka aanay ardaydu nasiin magacyadooda. Ilaa 96 kun oo ardayda gobolka Maine ah ayaa laga codsaday inay ka qayb qaataan baaritaanka. Baaritaanku waxa uu qaadan doonaa qiyaastii waqtiga hal xiisad. Waxaa hoos ku xusan jawaabaha su'aalaha laga yaabo inaad ka qabi doonto baadhitaanka

**Waa maxay su'aalaha la'isku waydiiyo baaritaanka?**

Baaritaanku waxa uu waydiiyaa su'aalo ku saabsan caafiimaadka iyo dabaacadaha la xiriira caafimaadka. Qaar ka mid ah mowduucyadu kujira waa:

- Neef
- Waxa ardaygu uu uu cuno
- Dhaqaaqa Jidhka
- Sigaar cabid
- Cabidda khamriga
- Daroogooyin Kale
- Ka hortaga Ku gubashada cadceeda
- Curyaanimu
- Dagaal iyo daan daansi
- Galmada
- Murugoda iyo isdilka
- Khamaarka

Waxaa kale ooy waydiisaa saamaynta iskuulka, bulshadooda dhexdeeda, qoyskooda gudihiisa iyo saaxiibadood dhexdooda taasoo laga yaabo inay caawiso ama ay handadaad galiso doorashooyinka caafimaad ee ardayga. Su'aalahana waxa kamida mawduucayo sida:

- Hadii ay u badan tahay in ardayga lagu qabto isticmaalka tubaakada ama daroogada
- Hadii ay saaxiibadood isticmaalaan daroogo
- Hadii ay ka qaybqaataan kooxo ama adeegyada bulshada
- Gargaar iyo xeerar noocma ah ayay ku haystaan iskuulka iyo guriga

Su'aaluhu waxay ku kala duwanaanayaan galaaska ardayga. Waxayna kuhaboon yihiin da'da ardayga. Waad eegi kartaa su'aalaha la waydiin doono, adiga oo la hadla iskuulka ilmahaaga ama soo booqda bogga internetka MIYHS.

**Halkuu Baaritaankani ka yimid?**

Waxaa baaritaankan si wadajir ah ugu soo dadaalay Waaxdda Caafimaadka iyo U Deega Bulsha ee (DHHS) iyo Waaxda Waxbarasha ee Maine (DOE). Baaritaankani waxaa loo isticmaali doonaa in si dheeraad ah loo barto dhamaan ardayda Maine. Natiijadan waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo helid maalgalined, caawimaad go'aanka barnaamijyada lagu deeqo, ama inay xukumaan sida uu dadaalka hada jiraa u shaqaynayo.

### **Waa maxay sababta uu ilmahaagu uga qayb qaadanayo baaritaankan**

Natiijada baaritaankani waxa uu caawin doonaa barnaamijyada gobolka, ururada bulshada iyo in ay iskuuladu ilmahaaga sifiican ugu adeegaan.

### **Sidee baan u habsan karaa in uusan baaritaankani dhib ukeenayn ilmahaaga?**

- **Ilmahaaga xor buu u yahay inuu sameeyo baaritaanka ama uu diido.** Haddii ilmahaagu uu doorto in uusan ka qayb qaadan baaritaanka, macalinka ayaa ilmaaha siin doonaa waxyaabo kale uu sameeyo wakhtiga galaaska.
- Ardayda qaarkood waxa laga yaabaa in ay su'aalaha qaarkood ay ku adkaadaan. waxa jiri karta inuu ilmahaagu khatar u yihiin inay ka jawaabida su'aalaha qaarkood ay ku dareemaan si aan raaxo lahayn.
- Arday kasta wuu ka boodi karaa su'aal kasta oo isaga ama iyadu ayna rabin in ay ka jawaabaan.
- Haddii uu ilmahaagu dhibsado inta lagu guda jiro ama ka dib tirakoobka, shaqaalaha iskuulka waxay diyaar u yihiin in ay kula hadlaan oona ku siiyaan xogag.
- Majirto wax ganaax ah ka qaybqaadasha li'ida baaritaanka.
- **Baaritaanka waxaa loo habeeyay inuu ilaaliyo ilmahaaga wixii u gaar ah.**
- Jawaabaha ka ahaada arday kasta ma ahan kuwo loo sheego si gooni ah. Ardayna magaciisa waligii laguma sheegayo warbixinta.
- Wax warbixin oo ilmaaha ku xiriirinaysa jawaabohooda baaritaanka la ma hayndoono.
- Baaritaankan lagu sameynayo bogga internetku ma ururiyo cinwaanada IP-ga ama cinwaanada iimeylka sidaa darteed ilmahaagu wuxuu gebi ahaanba ahaan doonaa mid qarsoon xogtana waxa lagu keydiyaa xog-keydiye amaan ah.

### **Ka waran haddii aan su'aalo dheeraad ah ka qabo baaritaanka?**

- Haddii aad rabto inaad aragto su'aalaha la is waydiin doono, waxaad balan ka samaysan kartaa xafiiska iskuulka ka hor tariikhda baaritaanka. ama booqo bogga internetka MIYHS: [www.maine.gov/MIYHS](http://www.maine.gov/MIYHS)
- Haddii aad wax su'aal ah ka qabto baaritaankan, kala xiriir:  
Korey Pow (Maine CDC) lambarkan (207) 287-5084 ama iimeyl ugu dir [korey.pow@maine.gov](mailto:korey.pow@maine.gov)  
Jean Zimmerman (Maine DOE) lambarkan (207) 215-6841 ama iimeyl ugu dir [jean.zimmerman@maine.gov](mailto:jean.zimmerman@maine.gov)
- Haddii aad wax su'aal ah ka qabto xuquuqdaada ama xuquuqda ilmahaaga uu kaga qayb qaadanayo baaritaankan, waxaadkawici kartaa Maamulaha Ilaalada Bani'aadamka USM lambarkan (207) 228-8434 iyo/ama iimayl ugu dir cinwaankan [usmorio@maine.edu](mailto:usmorio@maine.edu). Madaxa Guddiga Muraajacada Machadka (IRB) ee jooga Jaamacada Koonfurta Maine wuxuu oggolaaday isticmaalka baaritaankan. IRB ayaa masuul ka ah ilaalinta xuquuqaha iyo nolol wanaaga dadka ka qayb qaadanaya baaritaanka.

Haddii aadan jeclayn inuu ilmahaagu ka qayb qaato baaristan fadlan la xiriir xafiiska iskuulka. Waxa kalood diidi kartaa in ilmahaaga la cabbiro ama la miisaamo. Haddii aan warkaa heli wayno, ogololaanshaha ka qayb qaadashada ilmahaagu waxaan umalyn doonaa inaad ogoshahay. Ilmahaagu waxa kale uu go'aansan karaa inuuna ka qaybqaadan maalinta la samaynayo baaritaanka.

Daacadnimo,

<<PRINCIPAL'S NAME>>

Maamulaha